



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 11, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Adeegyada hay'ada ka dib joojinta Mentor

Sida lagu tilmaamay [farriintii dhawaan](#), Mentor Network waxay joojin doontaa adeega ka jira Oregon marka la gaaro Ogoosto 31, 2021.

Joojintani waxaa ka mid ah adeegyada Hay'adu siiso qiyaastii 1,200 dadka waaweyn ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

ODDS waxay dib u eegaysaa soo jeedin ka timid [Ururka Adeegyada Taageerada ee Oregon](#), oo ah urur matala Hay'adaha Oregon, si loo bixiyo adeegyada hay'adaha Mentor ee hadda jira. Wada xiriir ayaan ka soo sameyn doonaa tallaabooyinka xiga marka faahfaahinta la dhammeystiro.

Waad mahadsan tihiin dhammaan Hay'adaha iyo daryeel bixiyayaasha ku lug yeeshay si loo xiqiijiyo in dadka reer Oregon ee qaba I/DD ay sii wataan helitaanka adeegyo iyo taageerooyin tayo leh.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.